



Tixraac: SSC/WM/XW/XN011/2024

Taariikh: Meey 1, 2025

XEER-NIDAAMIYAHA GUDDIGA MAAMULKA LACAGTA (GML),

Isagoo fulinaaya mid ka mid ah ujeeddooyinka lagu sheegay Qodobka 2 (4) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud oo tilmaamaya in la sameeyo nidaam cad oo lagu maamulo Maaliyada Maamulka si loo hubiyo isla xisaabtan dhamaystiran, isla markaana loo sharciyeeyo qaabka ugu haboon ee diyaarinta iyo isticmaalka Miisaaniyada Maamulka SSC-Khaatumo.

Isagoo u hoggaansamaya awoodadaha lagu sheegay Qodobka 8(1) ee Xeerka Maamulka Maaliyadda Guud oo tilmaamaya in Wasiirka Maaliyadda masuul ka yahay dhammaan siyaasadaha iyo xaaladaha farsamo ee la xiriira habsami u socodka Nidaamka Maamulka Maaliyadda Maamulka iyo taabagalinta dhamaan agabyadda iyo dukumiintiyada uu dalbanayo Xeerkan.

Markuu arkay Qodobka 9 (1) xarafka L ee Xeerka Maamulka Maaliyadda Guud: Xeer 1/2023 oo tilmaamaya in Wasiirka Maaliyaddu sameeyo Xafiiska nidaam isku xiran oo ku haboon xakamaynta kharashyada iyo dhacdooyinka kale ee dhaqaale ee lagu galay miisaaniyada Maamulka, sidoo kale maamulka lacagaha.

Markuu arkay Qodobka 44(3) ee Xeerka Maamulka Maaliyadda Guud: Xeer 1/2023 oo tilmaamaya in Wasiirka Maaliyaddu soo saarayo xeer-nidaamiye qeexaya sida ugu wanaagsan ee Dowladdu u isticmaalayso lacagta.

Isagoo gudanaya Qodobka 10 (4) ee Xeerka Maamulka Maaliyadda Guud: Xeer 1/2023 oo tilmaamaya in Wasiirka Maaliyaddu sameeyo, magacaabana Gudiga Maamulka Khasnaadda Guud.

Wasiirka Maaliyaddu wuxuu soo saaray Xeer-nidaamiyahaan:

Qodobka 1aad:

Dhisidda Guddiga Maamulka Lacagta (GML)

1. Guddiga Maamulka Lacagta (GML) waxaa lagu dhisayaa awoodda Wasiirka Maaliyadda wuxuuna ku soo saarayaa wareegto rasmi ah, si ay u jaangooyaan una korjoogteeyaan lacagaha caddaanka ah ee dawladda.
2. Guddigu wuxuu korjoogteynayaa, ka talobixinayaa, jaangoohnayaa, go'aaminayaa lacagaha caddaanka ah, wuxuuna dabarka lacageed (cash ceiling).

Qodobka 2aad:

Ujeeddooyinka Guddiga

1. Ujeeddooyinka Guddiga Maamulka Lacagta (GML) waxaa ka mid ah:
 - a. In guddigu si joogto ah u hubiyo hadhaaga lacageed ee dawladda iyo baahiyaha.

Qodobka 3aad:

Xubnaha Guddiga

1. GML waxa guddoominaya Agaasimaha Guud, Wasaaradda Maaliyadda, xubnaha guddigu waxay ka koobnaandoonaan xubnahan hoose:
 - a. Agaasimaha Guud, Wasaaradda Maaliyadda (Gudoomiyaha).
 - b. Xisaabiyaha Guud
 - c. Guddoomiyaha Bangiga Dhexe
 - d. Agaasimaha Miisaaniyadda
 - e. Agaasimaha Dakhliga

Qodobka 4aad:

Masuuliyadah iyo Shaqada Guddiga

1. Masuuliyadah iyo shaqada Guddiga waxaa ka mid ah
 - a. Dib u eegista miisaaniyad sanadeedka si loo qiimeeyo noocyada dakhli ee ay suurto gal tahay bishiiba in helo.
 - b. Dib u eegista miisaaniyadda sanadlaha ah si loo ogaado kharashaadka ku talagalka ah iyo noocyada kharashaadka billaha ah.
 - c. Falanqaynta qorshayaasha kharashka saddex biloodlaha ah ee ay soo gudbiyaan Hay'adaha Dawladdu.

- d. Go'aaminta lacagaha loo heli karo kharashyada hawl socodsiinta iyo dejinta dabarka lacagta caddaanka ah (Cash Ceiling) ee hay'ad kasta oo kharash-bixineed ee ay fulinayso Waaxda Miisaaniyaddu.
- e. Dib u eegista hadhaaga lacagta caddaanka ah ee toddobaadlaha iyo billaha ah.
- f. Diyaarinta warbixinta saadaasha kharashyada iyo dakhliyada la saadaaliyey iyo u gubinta Wasiirka talooyinka saadaasha si Wasiirku wax uga qabto lacag yaraanta jirta.
- g. Ansixinta iyo dhaqangelinta shuruudaha warbixinta hadhaayada bangiyada maalinlaha ah iyo warbixinta bangiyada toddobaadlaha ah.
- h. Baadhista heerka fulinta miisaaniyada WWW (MDAs) iyo caddaynta xaaladaha walaaca leh ee uu Wasiirku kala hadli karo Wasiirka/Madaxa WWW (MDAs) ee ay khusayso.
- i. Dib u eegis warbixinaha kooban ee saddex biloodlaha ah ee ay diyaariso Qaybta Maamulka Lacagta (QML).
- j. Kormeerka iyo jihataynta QML iyo hirgelinta qorshe hawleedka maamulka lacagta caddaanka ah.
- k. Korjoogteynta dibuhabaynta lacagta caddaanka ah ee Maamulka Maaliyadda Guud ee saamaynta ku leh maamulka lacagta caddaanka ah.

Qodobka 5aad:

Shirarka Guddiga

1. Guddiga Maamulka Lacagta (GML) waxay shirayaan toddobaadkii labo maalin oo ku asteysan maalinta Sabtida iyo Talaadada.
2. Maalinta Sabtida waxay go'aamin doonaan kharash bixinta maalmaha Axadda iyo Isniinta, Maalinta Talaadada waxay go'aamindoonaan kharash bixinta maalmaha Arbaca iyo Khamiista.
3. Maalmaha kharash bixinta dawladdu waxaa loo asteeyey afar maalmood oo kala noqonaya: Axad, Isniin, Arbaca iyo Khamiis si Sabtida iyo Talaadadu u noqdaan maalmaha jaangooynta kharash bixinta.

Qodobka 6aad:

Warbixinnada iyo Xisaab Celinta Guddiga

1. Guddigu waa inuu si maalinle ah u diyaariyaa warbixinta dakhliga, kharashka, hadhaayada bangiyada iyo ballaanqaadyada taagan.
2. Maalinta Sabti iyo Talaadada waa in qayb kastaa warbixinta khuseysa u soo gubisaa:
 - a. Agaasimaha Dakhligu waa inuu soo gubiyaa warbixinta dakhliga

- b. Agaasimaha Miisaaniyaddu waa inuu soo gubiyaa baahiyaha iyo ballanqaadyada taagan:
- c. Xisaabiyaha Guud waa inuu soo gubiyaa hadhaayada bangiyada.
- d. Guddoonka Bangigu waa inoo soo gudibiyaa warbixinta akoonada.
- e. Xisaabiyaha Guud waa inuu diyaariyo Warbixinta Lacagta caddaanka ah: dakhliyada soo xaroodey, kharashyada baxay, hadhaayada bangiyada, lana wadaagaa Wasiirka iyo GML.

Qodobka 7aad

Wareegtooyin

1. Wasiirka Wasaaraddu wuxuu awood u leeyahay inuu soo saaro, wareegtooyin, hageyaal iyo tilmaamo lagu saxayo, laguna toosinayo Xeer-nidaamiyahan oo aan ka horimaanayn qodoboda Xeerka Maamulka Maaliyadda Guud iyo Xeer-nidaamiyahan.

Qodobka 8aad

Dhaqangelinta Xeer-nidaamiyahaan

1. Xeer-nidaamiyaha Guddiga Maamulka Lacagaha waxa uu dhaqangelayaa taariikhda uu saxiixo Wasiirka Maaliyadda.

Cabdiqani Xuseen Xaaji Hiirad

Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda SSC Khaatumo

Saxeex:

Abdittin

